

WAXYAABAHA SIDA SHILKA KU GALA AMA SIDA TARTIIBTA AH UGU QULQULA NIDAAMKA BULAACADAHA



Cida ay tahay in la soo waco

**Ka wac Sarkaalka Shaqada uga Jiro
Minnesota (Minnesota Duty Officer)**

651-649-5451

Sarkaalka Shaqada uga Jiro Minnesota (Minnesota Duty Officer) ayaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, toddobo maalmood usbuucii. Sarkaalka shaqada ku jira wuxuu qoraa dhammaan macluumaadka wuxuuna ogeysiiyaa hay'adaha kale ee dawliga iyo kuwa maxalliga ah marba sida loogu baahdo, oo ay ku jiraan Met Council's Environmental Services.



Cidee soo wici karta

Qof kasta oo oggaada in ay bulaacadaha dadweynaha ay wax ku daateen waa inuu isla markiiba ku soo wargeliyaa Sarkaalka Shaqada ku Jira ee Minnesota (Minnesota Duty Officer).

Wac 911 wac marka hore haddii ay jirto wax khatar ku nafta ama dhismaha.



Xilliga ay tahay in wicida la sameeyo

**Walaacyada waxyaabaha ku
daadanaya**

- Waxyaaba sunta ah, guban kara, waxyaaba wax daxaleeya, iyo kiimikooyinka kale ee khatarta ah ee warshadaha tiro kastaba ha ahaadaane.

- Si tartiiba u qubashada* caanaha, sonkor, iyo cuntooyinka kale

- Si tartiiba u qubashada* biyaha wasakhda ah oo leh mug noocan ah ama awood noocan oo kale ah ayay u badan tahay inay sababto faragelin, kasoo qulqula, ama dhibaatooyin ku keena dhanka shaqada nidaamka bulaacadaha.

* Soo siideynta qashin kasta oo ka badan cuf ahaan ama tirsi ahaan ka badan afar jeer celceliska cufka ama heerka uu ku socda maalmaha shaqada ee caadiga ah.

Qof kasta oo masuul ka ah inay wax un si shil ah ku galaan ama si caadi ah loogu shubo nidaamyada bulaacadaha dadweynaha waa inay tallaabo degdeg ah qaadaan sida ugu macquulsan ee ay awoodaan inay joojiyaan waxa galaya bulaacada. Qofka mas'uulka ah waa inuu sameeyaa tallaabo kasta oo xakameyn iyo nadiifin ah oona lagama maarmaan ah si looga hortago shil dheeraad ah ama waxyaabaha mamnuuca ah inay ku qulqulaan nidaamyada bulaacadaha dadweynaha.